# Kulamada Xalinta Waxbarashada Gaarka ah

## Tilmaamta Waalidiinta Caruurta & Dhalinyarada (Da'da 3-21)

Daabacaadani waxay kamid tahay taxane Individuals with Disabilities Education Act, IDEA (Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Laxaadka La') ikhtiyaarada xalinta khilaafaadka. Tilmaamaha waalidka ee taxanahan waxaa kamid ah:

Dhaxdhaxaadinta Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA
Cabashooyinka Gobolka ee Loo Qoray Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA
Cabashooyinka Nidaamka Aan Dhamaanin ee Waxbarashada Gaarka ah/Dalabyada Dhagaysiga IDEA
Kulamada Xalinta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA

CADRE
Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education

IDEAs that Work
Office of Special Education Programs
U.S. Department of Education

*Daabacaadan waxay sharaxaysaa Cabashooyinka Kulamada Xalinta Khilaafka guud ahaan Qaybta B ee IDEA. Looguma talo galin inay ka turjunto, waxka badasho, ama badasho wixii nidaam ilaalin ah ama waajib sharciga federalka ama gobolka ah.*

## Waa Maxay Kulanka Xalinta Khilaafku?

Kulanka xalinta khilaafku waa nidaam lagu xaliyo khilaafka kaas oo qabsooma kadib marka waalidku cabasho nidaamka socda ah gudbiyo. Kulanka xalinta khilaafku waxa uu waalidka iyo degmooyinka dugsiyada siiyaa fursad ah inay xaliyaan waxa dhax yaala kahor inta ayna iman dhagaysiga nidaamka socda.

- Kaqayb galayaasha waxaa kamid ah waalidka, qof ka socda degmada dugsiga kaas oo dugsiga go'aano uu ku matalayo gaadhi kara, iyo xubnaha kooxda baraamijka waxbarashada shakhsi ahaaneed (individualized education program, IEP) kuwaas oo aqoon u leh macluumadka kor ku qoran ee cabashada nidaamka socda. Waalidku waxa uu dooran karaa inuu soo kaxaysto cid u ololeysa, looyar, ama qof kale oo taageero ah.
- Waalidka iyo degmada dugsiga ayaa si wada jir ah u go'aamiya xubnaha kooxda IEP ay iman karta kulanka xalinta khilaafka.
- Wada shaqaynta si loo xaliyo khilaafka waxay baajin kartaa baahida dhagaysiga nidaamka socda, kaas oo kharash badan ku kaca saamayn xuna ku yeesha xidhiidha.

Gobolada qaar waxay bixiyaa fududeeye kulamada xalinta khilaafka marka waalidka iyo degmada dugsigu dalbato. IDEA shardi kama dhigto in la diyaariyo fududeeye kulamada xalinta khilaafka ah.

Hadii aad u malaynayso inay wanaagsan tahay in la helo qof dadka kulanka jooga wada hadalka ka caawin kara, waxaa fiican inaad labada doonto cid dhex dhexaadin ah halka laga qaban lahaa kulanka xalinta khilaafka. Wixii macluumaad dheeraad ah, ee *Dhex Dhexaadinta Waxbarshada Gaarka ah ee IDEA*.

## Siduu U Qabsoomaa Kulanka Xalinta Khilaafku?

- Degmada Dugsigu waa inay 15 maalmood ku qabataa kulan xalin khilaaf oo ka bilaabanta marka uu ay soo gaadhay wargalinta cabashada nidaamka socda ee waalidku.
- Kulanku waa in uu qabsoomaa iyada oo waalidka iyo degmada dugsigu si wada jir ah ugu heshiiyaan iyada oo qoraal ah inaan la qaban kulanka, ama ay ku heshiiyaan inay isticmaalaan nidaamka dhex dhexaadinta.

Shuruucda ururka goboleedyada IDEA nidaamkooda xalinta khilaafku uu kala duwan yahay.

Waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxaa lagu dhiiri geliyaa inay la xidhiidhaan hay'adooda waxbarashada gobolka ama xarunta waalidka wixii macluumaad dheeraad ah.

## Faa'idooyinka Kulanka Xalinta Khilaafka

- Kulamada Xalinta Khilaafku waa fursad muhiim ah oo lagu xidhiidho oo kor loogu qaado xidhiidha adiga iyo dugsiga ilmaha. Waxay bixiyaan fursad lagu wada shaqeeyo si loo xaliyo xaalada jirta kahor inta aanu qabsoomin dhagaysiga nidaamka socdaayi.
- Kulanka xalinta khilaafku waxa uu go'aanka kusoo wareejiyaa adiga iyo dugsiga. Dhagaysiga nidaamka soca, sarkaalka dhagaysiga ma yaqaan ilmahaaga waxaanu go'aamiyaa xalka khilaafka.
- Waxaa joogi doona kulanka qof go'aanada u gaadhaya degmada dugsiga oo matalaya.

## TIlmaamo Waxtar Leh Oo Aad Iskugu Diyaarinayso Kulanka Xalinta Khilaafka

- Garo xaalada markaad aragto, cadee waxa aad isleedahay in uu ilmahaagu u baahan yahay, oo la kaalay fikiro xalal noqon kara, oo ay kamid yihiiin waxyaabaha la cadeeyay inay waxtar leeyihiin.
- Isku duba rido waraaqahaaga oo qor taariikhda oo qoraal ku dul qoro. Usoo qaado kulanka, markaad imanayso iyo wixii kale ee aad ku xoojin karto fikirkaaga.
- Ku celceli marka hore waxa aad doonayso inaad kulanka ka dhax tidhaahdo oo ku barbar cid aad garanayso, saaxiib, ama ololeeye.
- Isku day inaad ka fikirto su'aalo ay macquul tahay inuu dugsigu ku waydiiyo oo qor jawaabahaaga.
- Ka fikir sida aad u qorshaysan lahayd sidii aad dareenkaada u xakamayn lahayd (kaaga iyo ka dadka kale) inta uu kulanku socdo.
- Waxay u badan tahay in kulanku horseedo in heshiis uu ka dhasho hadii dadka oo dhami si wanaagsan isku dhagaystaan oo ay is qadariyaan.

## Suaalo Badanaa La Iska Waydiiyo Xalinta Khilaafka

*Waa lagu qabtaa kulanka xalinta khilaafku?*

Waxaa lagu siin karaa fursad aad ku sheegto wixii walaac ah ee aad qabto aad ku sheegtay cabashada nidaamka socda, oo ay kamid yihiin qaababka looga jawaabayo cabashooyinkaas.

*Kulanka xalinta khilaafka mala qaban karaa maalin aanu dugsigu fasax ahayn?*

Haa. Degmada dugsigu waa inay kulanka mudaysaa 15 <u>maalmood</u> gudahood oo ka bilaabanta wakhti ay soo gaadhay wargalinta cabashada nidaamka socda, iyada oo aan loo eegeynin hadii dugsigu fasax yahay iyo in kale.

*Siday wax noqonayaan hadii aanan iman karin wakhtiga loo qabtay kulanka xalinta khilaafku inuu qabsoomo?*

Degmada dugsigu waa inay dadaal samaysaa ay kulanku ku mudaynayso wakhti cid wal oo ku lug lehi ku iman karto. Hadii

aanad iman karin kulanka, degmada dugsigu waxay isku dayi kartaa inay ikhtiyaar ka duwan oo aad kaga qaayb geli karto sida kulan maqal iyo muuqaal ah ama kulan taleefanka ah.

### *Siday wax noqonayaan hadii aanan doonayninba inaan ka qayb galo kulanka xalinta khilaafka?*

Iyada oo adiga iyo degmada dugsigu ku heshiisaan in aan la qabto kulanka xalinta khilaafka moojee, ama inaad isticmaashaan dhex dhexaadin, waa muhiim inaad ka qayb gasho kulanka xalinta khilaafka. Hadii aanad kaqayb galin, degmada dugsigu waxay ka dalban kartaa sarkaalka dhagaysiga in meesha laga saaro cabashadaada nidaamka socda oo la joojiyo dhagaysiga.

### *Siday wax noqonayaan hadii dugsigu mudo u qaban waayo kulanka?*

Hadii degmada dugsigu ayna mudaynin kulanka xalinta khilaafka wakhtigii waajibka ahaa gudaheeda, waxaad ka dalban kartaa sarkaalka dhagaysiga inuu qabto mudada dhagaysiga. Eeg *Cabashooyinka Nidaamka Socda ee Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA/Dalabyada Dhagaysiga* wixii macluumaad dheeraad ah.

### *Waxa lagaga wada hadlay kulanka xalinta khilaafku masirbaa?*

Maya iyada oo adiga iyo degmada dugsigu aan ku heshiisaan inuu sir noqdo moojee. Hadii sirtu muhiim tahay kuu tahay adiga iyo degamda dugsiga, waxaad kala saxeexan kartaan heshii sir ah ama in lagu daro heshiiska xalinta khilaafka. Khasab lagaagama dhigi karo inaad saxeexdo heshiis sir ah si aad uga qayb gasho kulanka xalinta khilaafka.

### *Looyar miyii kasoo qayb geli karaa kulanka xalinta khilaafka?*

Degmada dugsigu kaliya waxay soo kaxaysan kartaa looyar hadii waalidku ogolaado inuu soo kaxayso looyar.

### *Siday wax noqonayaan hadii aan u baahanahay turjumaan?*

Waa muhiim inaad fahmi karto oo aad si buuxda uga qayb geli kartaa kulanka xalinta khilaafka iyo nidaamka. Qof kasta oo ku lug leh u sheeg inaad u baahan tahay turjumaan. La xidhiidh hay'adaada waxbarashada gobolka (SEA wixii macluumaad dheeraad ah.

### *Sideen ku ogaanayaa in dugsigu u hogaansami doono heshiiska?*

Heshiiska ay isla meel dhigeen qoysaska iyo dugsiyadu waxay u badan tahay in loo hogaan samo. Heshiiska xalinta khilaafka ah ee qoran ee ay wada saxeexaan waalidka iyo degmada dugsigu waxaa dhaqan galinaysa maxkamada, gobolada qaarna, SEA.

*Siday wax noqonayaan hadii aan iska maanaco heshiiska kulanka xalinta khilaafka kadib?*

Waalidiinta ama degmada dugsigu waxay joojin karaan heshiiska xalinta khilaafka 3 maalmood gudahood marka heshiiska ka saxeexo kadib.

*Siday wax noqonayaan hadii aanu heshiin wayno inta uu socdo kulanka xalinta khilaafku?*

Adiga iyo degmada dugsiga ayaa sii wadi kara wada hadalka kulanka xalinta khilaafka kadib, idinka oo ka wada shaqaynaya sidii loo xalin lahaa khilaafka ee heshiis loo wada geli lahaa.

- Waxaad ka dalban kartaa sarkaalka dhagaysiga inuu wakhti dheeraad ah idin siiyo oo aad khilaafkiina ku xalisaan.
- Waxaad isku deyi kartaa dhex dhexaadin, halka aad isleedahay dhex dhexaadintu waxay fududayn kartaa xidhiidhka adiga iyo dugsiga.
- Hadii adiga iyo dugsigu aad ku heshiin waydaan 30 maalmood gudahood oo ka bilaabma wakhtigii la gudbiyay cabashada nidaamka socda, waxaad looga socon karaa dhagaysiga nidaamka socda.

*Yaa bixinaya kharashka kulanka xalinta khilaafka?*

Waalidiinta wax kharash ah kuma taagna. Adiga oo looyar qabsada moojee, adduunka kaliya ee kaa galayaa waa wakhtiga aad ku bixisay diyaar garawga iyo ka qayb galka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xalinta khilaafka waxbarashada gaarka ah iyo ikhtiyaarada xalinta khilaafka waxaa ka heleysaa IDEA, booqo Websaytka CADRE:
cadreworks.org

## Waxyaabo Muhiim ah Oo Lagu Xisaabtamo Kulanka Xalinta Khilaafka

- Ka qayb galka kulanka xalinta khilaafka, iyo sidoo kale u diyaar garawgiisuba, waa hawl - dareen ahaan iyo maskax ahaanba. Inaad wakhti siiso marka hore diyaar garawga kulanku aad ayay faa'ido u leedahay, waxayna kor u qaadaysaa fursada ah in heshiis la gaadho.
- Hadii ay kugu adag tahay inaad wada hadashaan degmada dugsiga, waxaad dalbataa hadii cid kale oo sadexaad madasha hogaamiso oo ay idinka caawiso kulanka xalinta khilaafka, ama waxaad ku talin kartaa in cid dhex dhexaadin ah la doonto halka kulanka xalinta khilaafka laga geli lahaa.
- Ma jirto wax damaanad ah in heshiis lagaadhi doono.
- Wixii lagu wada hadlay in uu socday kulanka xalinta khilaafku sir maaha iyada oo adiga iyo degmada dugsigu aad ku heshiisaan inuu sir noqdo moojee.

## Isha Macluumaadka Muhiimka ah

Liiska wakhtigan ee dhamaan xarumaha waalidka ee dalka oo dhan waxaa laga heli karaa Xarunta Macluumaadka Waalidka iyo Khayraadka (Center for Parent Information and Resources, CPIR): parentcenterhub.org/find-your-center la hadal (973) 642-8100

Xarunta Xalinta Khilaafka Munaasabka ah ee Waxbarashada Gaarka ah (Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education, CADRE) waa xarun kaalmo farsamo oo qaran oo qalin khilaafka ah: cadreworks.org ama la hadal (973) 686-5060

Macluumaadka ku saabsan Sharciga Waxbarshada Shakhsiga Laxaadka La' (IDEA) waxaa laga heli karaa onlayn ahaan: https://sites.ed.gov/idea/

## Hel Macluumaadka Lagala Xidhiidhayo Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

**Region 1 Parent TA Center**
NJ Statewide Parent Advocacy Network
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100
Faakis: (973) 642-8080
Websayt: spanadvocacy.org

**Region 2 Parent TA Center**
Exceptional Children's Assistance Center
907 Barra Row, Suites 102/103
Davidson, NC 28036
Taleefan: (704) 892-1321
Faakis: (704) 892-5028
Websayt: ecac-parentcenter.org

**Region 3 Parent TA Center**
Parent to Parent of Georgia
3070 Presidential Pkwy, Suite 130
Atlanta, GA 30340
Taleefan: (800) 229-2038
Faakis: (770) 458-4091
Websayt: p2pga.org

**Region 4 Parent TA Center**
WI FACETS
600 W. Virginia St., Ste. 501
Milwaukee, WI 53204
Taleefan: (877) 374-0511
Faakis: (414) 374-4655
Websayt: wifacets.org

**Region 5 Parent TA Center**
PEAK Parent Center
611 N. Weber, Suite 200
Colorado Springs, CO 80903
Taleefan: (800) 284-0251
Faakis: (719) 931-9452
Websayt: region5ptac.org

**Region 6 Parent TA Center**
Matrix Parent Network & Resource Center
94 Galli Drive, Suite C
Milwaukee, WI 94949
Taleefan: (415) 884-3535
Faakis: (415) 884-3555
Websayt: matrixparents.org

**Center for Parent Information and Resources (CPIR)**
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100 Faakis: (973) 642-8080
Websayt: parentcenterhub.org

## Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

ADRE waxay waraaqa u diyaarisaa si waafaqsan xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, Heshiika Xafiiska Isku Duwida Baraamijyada Waxbarashada Gaarka ah Lam. H326D080001. Tina Diamond, oo haysata shahaadada Ph.D., waxey eheyd sargaalka mashruuca. Afkaarta halkaan lagu shaaciyay mamathalayaan go'aanka Waaxda Waxbarashada ama TSharciyadeeda. Majirto ogolaansho guud ooy bixisay Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka oo ku saabsan wax soo saar wuxuu ka ahaado, adeeg, ama ganacsi lagu xusay daabacaaddaan ama lagu ogolaado gabagaba ahaan. Waxsoo saarkaan waxey kujirtaa bandhigga bulshada. Ogolaanshaha lagu soo saaraaya guud ahaan ama qeyb ka mid ah waa laogolaaday. Inkastoo ogolaansho dib loogu daabaco aan loo baahneyn, waxa lasoo qaadanaayo waa inuu ahaado: CADRE (2014). Kulanka Xalinta Khilaadka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA, Eugene, Oregon, CADRE. Daabacaada waxaa sidoo kale kamid ah linkiyo iyo Cinwaano Websayto (URLs) ay sameeyeen oo ay gacantana ku hayaan hay'ada madax banaan oo loogu soo geliyay si ay akhristayaashu u heli karaan. Waaxdu kama masuul ah saxnimada macluumaadkan. Ogolaanshahan wax kamid ah ayaa hore loogu diyaariyay iyada Kaalmo Farsamo oo LAKAASHANAYO Xarumaha Waalidka. Taariikhda Daabacaada: Janaayo 2014.